WAAXDA CAAFIMAADKA MINNESOTA

# Heshiiska Deeqda

Heshiiskan deeqda ah wuxuu ka dhexeeya Gobolka Minnesota, isagoo ka wakiil ah Wasiirka Waaxda Caafimaadka ("MDH"), iyo Magaca Deeq-Qaataha ("Deeq-Qaate"). Cinwaanka Deeq-Qaatuhu waa Cinwaanka dhamaystiran ee Deeq-Qaataha.

## Hordhac

1. MDH waxa uu awood u leedahay in uu galo heshiiskan deeqda iyadoo la raacayo Qodobbada Sharciga Minnesota ee kala ah 144.05, 144.0742, ama sharciyada gaarka ah ee khuseyso barnaamijka haddii ay jiraan.
2. MDH wuxuu u baahan yahay… (halkaan ku qor dhowr sadar oo sharaxaya sida heshiiska deeqda uu uga caawinayo MDH inuu gaadho hadafkiisa iyo sida deeqdu u taageerayso yoolalka deeqda soo socota).
3. Himilada MDH waa sinnaanta caafimaadka ee gobolka Minnesota, halkaas oo dhammaan bulshooyinku ay kobcayaan, dhammaan dadkuna ay haystaan waxa ay u baahan yihiin si ay ugu noolaadaan nolol caafimaad leh. Sinnaanta caafimaadka waxa la gaaraa marka qof walba uu helo fursad uu ku gaaro awoodda buuxda ee caafimaadkiisa. Deeq-qaatuhu waxa uu oggol yahay, meelaha khuseeya, in uu shaqadiisa ku fulo iyadoo yool laga dhigayo horumarinta sinnaanta caafimaadka.
4. Deeq-Qaatuhu wuxuu caddeynayaa inuu si sharci ah u qalmo kana fulin doono dhammaan hawlaha la xiriira heshiiskan deeqda sida ku cad shuruudaha ku qoran. Deeq-Qaatuhu wuxuu sidoo kale oggol yahay in uu yareeyo kharashaadka maamulka isagoo raacaya Qodobka 16B.98, Qayb-hoosaadka 1 ee Sharciga Minnesota.

## Heshiiska Deeqda

### 1. Mudada Heshiiska

#### 1.1. Taariikhda Dhaqan-galka

TAARIIKHDA, ama taariikhda ay MDH hesho dhammaan saxiixyada looga baahan yahay sida waafaqsan Qodobka 16B.98, Qayb-hoosaadka 5 ee Sharciga Minnesota, midka kasta ee dhaqan-galakiisu ugu dambeeya ayaa la raaci doonaa. Sida ku xusan Qodobka 16B.98, Qayb-hoosaadka 7, wax lacag ah lama siin karo Deeq-Qaataha ilaa heshiiskan si buuxda loo saxiixo. Deeq-Qaatuhu ma bilaabi karo shaqada ilaa heshiiska si buuxda loo saxiixo oo uu MDH si rasmi ah ugu wargeliyo in shaqada la bilaabi karo. Kharashna lama galiyo ka hor inta aan heshiisku si buuxda u dhaqan-gelin.

### 1.2. Taariikhda Dhammaadka

TAARIIKHDA, ama ilaa dhammaan waajibaadka la helo taas oo ay ku qanacsan tahay MDH, hadba midka ugu horeeya.

### 1.3. Qodobbada Sii Jiraya kadib Dhammaadka Heshiiska

Qodobbada soo socda waa kuwo dhaqan-galkooda sii jiraya xitaa marka heshiiskan deeqda uu dhaco ama la kansalo: Mas'uuliyadda; Kormeerka Maaliyadda; Habraacyada Xogta Dowladda; Xaqiijinta U-hoggaansanaanta Canshuuraha; Milkiyadda Qalabka iyo Agabka; Xuquuqda Fikradaha iyo Hal-abuurka; Caanbixinta iyo Taageerada; iyo Sharciga Maamulka, Awoodda Maxkamadeed, iyo Meesha Dacwadda Lagu Qabanayo.

## 2. Hawlaha

### 2.1. Hawlaha MDH

Hawlaha MDH, oo waafaqsan siyaasadaha Xafiiska Maareynta Deeqaha ee Waaxda Maamulka ee Minnesota iyo xeerarka federaalka, waxaa ka mid noqon kara—laakiin kuma koobna—dib-u-heshiisiinta maaliyadeed, booqashooyinka goobta, kormeerka barnaamijyada la qabtay, iyo qiimaynta hawlaha deeqda.

### 2.2. Hawlaha Deeq-Qaataha

Deeq-Qaatuhu, oo aan ahayn shaqaale dawladdeed, waa inuu qabtaa hawlaha lagu qeexay **Lifaaqa A**, kaasoo ku lifaaqan heshiiskan deeqda isla markaana ka mid ah.

## 3. Waqtiga

Inta lagu jiro muddada heshiiska deeqda, Deeq-Qaatuhu waxaa laga rabaa inuu dhamaystiro dhammaan hawlaha lagu xusay heshiiskan deeqda iyo lifaaqyada la socda,. MDH kuma qasbana inay kordhiso muddada heshiiska. Haddii Deeq-Qaatuhu ku guul darreysto inuu buuxiyo waqtiyada kama dambaysta ah, MDH waxay u arki kartaa arrintaas in Deeq-Qaatuhu uusan u hoggaansamin shuruudaha heshiiska.

## 4. Abaalmarinta iyo Lacag-bixinta

MDH waxay siin doontaa Deeq-Qaataha lacagta loogu talagalay dhammaan hawlaha waafaqsan heshiiskan deeqda.

### 4.1. Abaalmarinta Deeqda

Lacagta dib-u-bixinta waxaa lagu bixin doonaa iyadoo la raacayo miisaaniyadda lagu heshiiyay oo ku lifaaqan Lifaaqa B, taas oo qayb ka ah heshiiskan deeqda.

## 4.2. Kharashaadka Safarka

Deeq-Qaatuhu waxa uu xaq u leeyahay in loo celiyo kharashaadka safarka sida qiimaha Mayleejka ee IRS u dejisay waqtiga safarku dhacay; kharashaadka cunto iyo hoyna waxaa lagu bixin doonaa si la mid ah—mana ka badnaan doonaan—qiyaasta lagu caddeeyay "Qorshaha Guddoomiyaha" ee hadda jira, kaasoo ay dejisay Waaxda Maamulka iyo Miisaaniyadda Minnesota (MMB); ama heerka uu Deeq-Qaatuhu dejiyay (dhamaan kharashaadka la xiriira safarka), midkooda hoose waqtiga safarku dhacay. Safarada iyo kharashaadka la xiriira safarada bannaanka Minnesota lama magdhabi doono ilaa Deeq-Qaatuhu helo oggolaansho qoraal ah oo hore uga yimid MDH. Minnesota waxaa loo tixgelin doonaa gobolka hooyo marka la go'aaminayo haddii safarka uu yahay mid bannaanka gobolka ah.

## 4.3. Isbeddelada Miisaaniyadda

Deeq-Qaatuhu wuxuu wax ka beddeli karaa qodob kasta oo miisaaniyadda ugu dambeysay ee la isku raacay ilaa boqolkiiba 10% iyadoo aan loo baahnayn oggolaansho qoraal ah oo hore uga yimid MDH. Si kastaba ha ahaatee, Deeq-Qaatuhu waa inuu si qoraal ah ugu wargeliyaa MDH isbeddel kasta oo gaaraya ilaa 10%, ugu dambeyn marka la gudbinayo biilka xiga. Haddii isbeddelka la damacsan yahay uu ka badan yahay 10%, Deeq-Qaatuhu waa inuu helaa oggolaansho qoraal ah oo hore uga yimid MDH. Haddii Deeq-Qaatuhu ku guul darreysto inuu helo oggolaanshadan, waxaa laga yaabaa in codsiga isbeddelka la diido, deeqda la joojiyo, ama labadaba. Wajibaadka guud ee MDH ee dhammaan magdhowyada iyo lacag celinta la siiyo Deeq-Qaatuhu **ma dhaafi doonto** qaddarka lagu caddeeyay qaybta "Wajibaadka Guud".

## 4.4. Wajibaadka Guud

Wajibaadka guud ee MDH ee dhammaan magdhowyada iyo lacagaha dib loo celinayo ee la siiyo Deeq-Qaatuhu marka la raacayo heshiiskan deeqda ma dhaafi doono $0.

## 4.5. Shuruudaha Lacag-Bixinta

### 4.5.1. Biilasha

MDH waxay si degdeg ah u bixin doontaa lacagaha Deeq-Qaatuha kadib marka Deeq-Qaatuhu soo gudbiyo biil faahfaahsan oo muujinaya hawlaha dhab ahaan la qabtay, waxaana la bixin doonaa marka Wakiilka qaabilsan ee MDH uu aqbalo hawlaha lagu sheegay biilka. Biilasha waa in la gudbiyaa ugu yaraan saddexdii biloodba mar (quarterly), ama sida lagu heshiiyo labada dhinac. Biilka ugu dambeeya waa in la gudbiyaa 30 maalmood oo shaqo gudaheeda kadib taariikhda dhamaadka heshiiskan deeqda.

### 4.5.2. Shuruudaha Isu-dheellitirka

Haddii ay khuseyso, Deeq-Qaatuhu wuxuu xaqiijinayaa in shuruudaha ku saabsan isu-dheellitirka deeqdan la buuxin doono, waxaana qaddarka isu-dheellitirka ah ee uu Deeq-Qaatuhu bixiyo noqonayaa: $0.

### 4.5.3. Lacagaha Federaalka

Lacagaha lagu bixiyo heshiiskan deeqda ah waxay si buuxda ama qayb ahaan ka imaanayaan lacago federaal ah oo ay MDH heshay iyadoo la marayo abaalmarinno ku cad Lifaaqa C, oo ay ku jiraan sharciyadii dadweynaha iyo dhammaan wax ka beddeladooda. Deeq-Qaatuhu waa masuul ka ah inuu u hogaansamo dhammaan shuruudaha federaalka ee lagu xiro lacagahaas, wuxuuna si buuxda u qaadanayaa masuuliyadda maaliyadeed ee ka dhalata haddii uu ku guul darreysto u hoggaansanaanta shuruudahaas.

## 4.6. Shuruudaha Qandaraasyada iyo Dalabyada Tartanka ah

### 4.6.1. Dawladaha Hoose

Haddii Deeq-Qaatuhu yahay dawlad hoose, sida lagu qeexay Qodobka 471.345, Qayb-hoosaadka 1 ee Sharciga Minnesota, wuxuu waajib ku yahay inuu raaco shuruudaha qandaraasyada ee lagu caddeeyay isla qodobkan sharciga. Mashaariicda ay ku jirto shaqo dhismeed waxay hoos imanayaan xeerarka mushaharka heerka guud ee shaqaalaha, oo ay ku jiraan kuwa ku qoran Qodobka 177.41 ee Sharciga Minnesota iyo wixii la mid ah.

### 4.6.2. Hay'adaha aan ahayn Dawladaha Hoose

Haddii Deeq-Qaatuhu uusan ahayn dawlad hoose, wuxuu ku waajibanyahay inuu raaco heerarka hoos ku qoran marka hawlaha heshiiskan lagu tilmaamay loo gudbinayo qandaraas-saddexaad:

i. Adeegyada ama agabka la filayo inay ka baxaan $100,000: Waa in la mariyaa hab tartan rasmi ah oo ay ka mid yihiin ogeysiis iyo hab dalab furan oo tartan ah.

ii. Adeegyada ama agabka qiimahoodu u dhexeeyo $25,000 ilaa $99,999: Waa in si tartan leh loo bixiyo iyadoo la helayo ugu yaraan saddex dalab afka ah ama qiyaaso.

iii. Adeegyada ama agabka u dhexeeya $10,000 ilaa $24,999: Waa in si tartan leh loo bixiyo iyadoo la helayo ugu yaraan labo dalab afka ah ama la siiyo ganacsade bartilmaameed ah.

iv. Deeq-Qaatuhu waa inuu qaado tallaabo kasta oo xaqiijinaysa in adeegyada ama alaabada la siinayo ganacsiyada la shahaadeeyay ee bartilmaameedka ah, haddii ay suurtagal tahay, kuwaas oo hoos imanaya**:**

1) Waaxda Maamulka Minnesotan Certified Targeted Group, Economically Disadvantaged and Veteran-Owned Vendor List (https://mn.gov/admin/osp/government/procuregoodsandgeneralservices/tgedvo-directory/);

2) Metropolitan Council's Targeted Vendor list: Minnesota Unified Certification Program (https://mnucp.metc.state.mn.us/); ama

3) Barnaamijka Shahaadaynta Ganacsiyada Yaryar ee ka socda Hennepin County, Ramsey County, iyo Magaalada St. Paul:aul: Central Certification Program (https://cert.smwbe.com/).

v. Deeq-Qaatuhu waa inuu haystaa xeerar qoran oo maamula akhlaaqda shaqaalaha, si looga fogaado is khilaaf danadeed, gaar ahaan kuwa ka shaqeynaya doorashada, bixinta, iyo maamulidda qandaraasyada.

vi. Deeq-Qaatuhu waa inuu hayaa dukumentiyo taageero ah oo muujinaya habka iibka ama tartanka qandaraaska ee loo adeegsaday bixinta adeegyada, laguna kaydiyo diiwaannada maaliyadeed ee deeqda. Waxa kale oo ay ku jiri karaan dukumentiyo caddaynaya sababta loo adeegsaday qandaraas hal ilo kaliya ah (single/sole source) haddii ay khuseyso.

vii. Si kastaba ha ahaatee, in kasta oo ay jiraan qodobbada (i) ilaa (iv) ee kor ku xusan, MDH waxay ka dhaafi kartaa shuruudaha rasmiga ah ee habka tartanka marka:

- Bixiyeyaasha (vendors) laga helay jawaabta codsi tartan ah oo loogu talagalay deeq (Request for Proposal - RFP) ay horay u ansixiyeen oo loo daray qorshaha shaqo ee la oggolaaday ee heshiiska deeqda, ama
- Marka uu jiro hal ilo sharci ah ama mid macquul ah oo kaliya oo laga heli karo adeegga ama alaabtaas, Deeq-Qaatuhuna uu caddeeyay in bixiyuhu (vendor) bixiyo qiime cadaalad ah oo macquul ah.

viii. Mashaariicda ay ku jirto shaqo-dhismeed (construction) oo ka badan ama la eg $25,000, waxay hoos imanayaan sharciga mushaharka heerka guud ee shaqaalaha, oo ay ku jiraan shuruudaha ku cad Qodobbada 177.41 ilaa 177.44 ee Sharciga Minnesota.177.44.

ix. Deeq-Qaatuhu ma samayn karo qandaraas la leh bixiyeyaasha (vendors) laga joojiyay ama laga mamnuucay Minnesota ama dawladda federaalka. Liiska bixiyeyaasha laga mamnuucay ee Minnesota waxaa laga heli karaa: Suspended/Debarred Vendor Detailed Information (https://mn.gov/admin/osp/government/suspended-debarred/). The list of suspended and debarred entities by the federal government is available at SAM.gov (https://www.sam.gov/) .

## 5. Shuruudaha Lacag-Bixinta

Dhammaan hawlaha uu qabto Deeq-Qaatuhu iyadoo la raacayo heshiiskan deeqda, waa in si buuxda loogu fuliyaa waafaqsanaan shuruudaha iyo xaaladaha lagu caddeeyay heshiiskan, sida uu go'aamiyay Wakiilka u xilsaaran ee MDH. Intaa waxaa dheer, dhammaan hawlaha uu qabto Deeq-Qaatuhu waa in lagu fuliyaa iyadoo si buuxda loo raacayo dhammaan sharciyada federaalka, gobolka, iyo kuwa deegaanka ee khuseeya, oo ay ku jiraan dhammaan xeerarka, awaamiirta iyo nidaamyada la xiriira. Sharciyada gobolka ee khuseeya waxaa ka mid ah, balse aan ku koobnayn, Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota (Sharciga Minnesota, cutubka 363A) oo mamnuucaya takoorka ku saleysan midabka, jinsiyadda, caqiidada, diinta, asal ahaan dalka laga soo jeedo, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, jiheynta galmada, da'da, xaaladda guurka, xaaladda helitaanka gargaar dadweyne, xaaladda qoyska, iyo naafonimada MDH ma bixin doonto wax lacag ah haddii hawsha la qabtay ay ku xadgudubto shuruudaha heshiiskan ama lagu qabtay si ka hor imanaysa sharciyo, xeerar ama nidaamyo federaal, gobol ama deegaan.

# 6. Wakiillada u Xilsaaran

## 6.1. Wakiilka u Xilsaaran ee MDH

ee MDH, u qaabilsan maamulka heshiiskan deeqda, waa magaca, jagada, cinwaanka, lambarka taleefanka, iyo iimaylka, ama qofka beddela. Wakiilkani wuxuu mas'uul ka yahay kormeerka waxqabadka Deeq-Qaataha iyo waxa uu leeyahay awoodda ugu dambeysa ee aqbalaada hawlaha la qabtay iyadoo la raacayo heshiiskan deeqda. Haddii hawlaha la qabtay lagu qanco, Wakiilka u xilsaaranee MDH ayaa ansixin doona aqbalaada biil kasta oo loo soo gudbiyo lacag-bixinta.payment.

## 6.2. Wakiilka u xilsaaranee Deeq-Qaataha

Wakiilka u xilsaaranee Deeq-Qaatuhu waa magaca, jagada, cinwaanka, lambarka taleefanka, iyo iimaylka, ama qofka beddela. Wakiilkani waxa uu leeyahay awood buuxda oo uu ku matalo Deeq-Qaatayaasha fulinta shuruudaha, xaaladaha, iyo waajibaadka ku xusan heshiiskan deeqda. Haddii Deeq-Qaatuhu magacaabo Wakiil cusub xilliga uu heshiiskani socdo, waxa waajib ku ah in si degdeg ah loogu soo wargeliyo Wakiilka u xilsaaranee MDH, iyada oo loo marayo qoraal iimayl ah ama warqad rasmi ah.

# 7. Wareejinta, Wax-ka-beddelka, Ka-Tagidda, iyo Dhammaan Heshiiska Deeqda

## 7.1. Wareejinta

Deeq-Qaatuhu ma wareejin karo, mana beddeli karo wax xuquuq ama waajibaad ah oo ka dhaxeeya isaga iyo heshiiskan deeqda.

## 7.2. Wax-ka-beddelka

Haddii wax laga beddelo heshiiskan deeqda, waa in wax-ka-beddelkaas lagu sameeyaa qoraal. Ma jiro wax-ka-beddel noqon kara mid dhaqan-galay ilaa iyo inta ay labada dhinac — MDH iyo Deeq-Qaatuhu — si rasmi ah u saxiixaan ugana oggolaadaan.

## 7.3. Ka-Tagidda

Haddii MDH ay ku guul-darraysato inay dhaqan-geliso qodob ka mid ah heshiiskan deeqda, taasi macnaheedu maaha in qodobkaas la baabi'iyay ama in MDH aysan u lehayn xuquuq ay ku dhaqan-geliso mustaqbalka.

## 7.4. Heshiiska Deeqda oo Dhammaystiran

Heshiiskan deeqda, iyo lifaaqyada lagu daray, waxay ka kooban yihiin dhammaan wadahadalladii iyo heshiisyadii u dhexeeyay MDH iyo Deeq-Qaataha. Ma jiro wax faham kale ah — ha ahaado mid qoraal ah ama mid afka ah — oo lagu adeegsan karo si uu u noqdo mid waajib ah oo labada dhinac ku xidhan.

## 8. Mas'uuliyadda

Deeq-Qaatuhu waa inuu magdhaw siiyo oo uu ka ilaaliyo MDH, wakiilladeeda iyo shaqaalaheeda dhammaan sheegashooyinka ama sababaha dacwadeed ee ka dhasha fulinta heshiiskan deeqda, haddii ay ahaato mid uu qabtay Deeq-Qaatuhu ama wakiilladiisa ama shaqaalaheeda, oo ay ku jirto kharashka qareennada ee uu MDH ku bixiyo arrimahaas. Qodobkan looma fasiran karo inuu meesha ka saarayo xuquuqda sharciga ah ee Deeq-Qaatuhu u leeyahay haddii MDH ku guul darreysto inuu buuxiyo waajibaadyada ku cad heshiiskan deeqda. Qodobkan sidoo kale looma fasiran karo in Deeq-Qaatuhu ka tanaasulayo difaacyada ama xaddidaadaha mas'uuliyadda ee uu xaq u leeyahay iyadoo la raacayo Qodobka 466 ee Sharciga Minnesota ama sharci kale oo khuseeya.

Mas'uuliyadda dhinac kasta waxaa lagu xukumayaa iyadoo la raacayo Qodobka 466 ee Sharciga Minnesota iyo sharciyada kale, xeerarka iyo nidaamyada khuseeya.

## 9. Kormeerka Maaliyadeed

Buugaagta, diiwaannada, dukumeentiyada, iyo nidaamyada iyo hab-raacyada xisaabaadka ee Deeq-Qaataha iyo hay'ad kasta oo uu la shaqeeyay si loo fuliyo ujeedada heshiiskan deeqda ah waxaa lagu baarayaa iyadoo la raacayo Qodobka 16B.98, Qayb-hoosaadka 8 ee Sharciga Minnesota. Kormeerrada waxaa qaban kara MDH, Wasiirka Maamulka ee Minnesota, Kormeeraha Maaliyadeed ee Gobolka Minnesota, ama Kormeeraha Sharci-dejinta ee Minnesota, sida ku habboon, muddo ugu yaraan lix sano ah laga bilaabo dhammaadka heshiiskan, gudbinta iyo oggolaanshaha dhammaan warbixinaha ugu dambeeya, ama muddada sharcigu farayo in la ilaaliyo diiwaanka—midka ka dambeeya ayaa la raaci doonaa.

## 10. Habraaca Xogta Dowladda

MDH, Deeq-Qaatuhu, iyo hay'ad kasta oo Deeq-Qaatuhu qandaraas la galay si loo fuliyo ujeedada heshiiskan deeqda ah, waa in ay u hoggaansamaan Xeerka Habraaca Xogta Dowladda ee Minnesota, oo ku cad Qodobka 13 ee Sharciga Minnesota, sida uu khuseeyo dhammaan xogta ay MDH bixisay iyadoo la raacayo heshiiskan deeqda, iyo sidoo kale dhammaan xogta uu Deeq-Qaatuhu sameeyay, ururiyay, helay, kaydiyay, isticmaalay, ilaaliyay, ama faafiyay isagoo fulinaya heshiiskan deeqda, sida lagu qeexay Qodobka 13.05, Qayb-hoosaadka 11(a) ee Sharciga Minnesota. Xalalka madaniga ah ee ku cad Qodobka 13.08 ee Sharciga Minnesota ayaa lagu dabaqi doonaa sii-deynta xogta lagu xusay qodobkan haddii ay sameyso MDH ama Deeq-Qaatuhu. Haddii Deeq-Qaatuhu helo codsi ku saabsan sii-deynta xogtan, waa inuu si degdeg ah u ogeysiiyo MDH. MDH ayaa siin doona Deeq-Qaatuhu tilmaamaha ku saabsan sida xogta loogu sii deyn karo cidda codsatay, ka hor inta aan wax xog ah la bixin. Jawaabta Deeq-Qaatuhu waa in ay si buuxda u waafaqsan tahay sharciga khuseeya.

## 11. Xaqiijinta U-hoggaansanaanta Canshuuraha

Deeq-Qaatuhu, iyo hay'ad kasta oo uu qandaraas la galay si loo fuliyo ujeedada heshiiskan deeqda, waxay oggol yihiin in la shaaciyo lambarkooda Aqoonsiga Bulshada (SSN), Lambarka Aqoonsiga Canshuurta Qofeed (ITIN), Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha (EIN), ama Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha Minnesota (TIN), kuwaas oo laga yaabo in horay loo siiyay MDH, lana siiyo hay'adaha

canshuuraha ee federaalka iyo gobolka iyo shaqaalaha dowladda ee ku lugta leh bixinta waajibaadka maaliyadeed ee gobolka, sida uu dhigayo Qodobka 270C.65, Qayb-hoosaadka 3 ee Sharciga Minnesota iyo dhammaan sharciyada kale ee khuseeya Lambarradan aqoonsiga waxaa loo adeegsan karaa fulinta sharciyada canshuuraha ee heer federaal iyo gobol, taas oo sababi karta in laga qaado tallaabo sharci ah oo lagu waajibinayo Deeq-Qaatuhu inuu gudbiyo foomamka canshuurta ee laga rabo, bixiyo canshuuraha dib-u-dhaca ah haddii ay jiraan, ama bixiyo waajibaad kale oo dowladda uga xiran.

Sida ku cad Qodobka 270C.65, Qayb-hoosaadka 3 ee Sharciga Minnesota iyo dhammaan sharciyada kale ee khuseeya, Deeq-Qaatuhu wuxuu si buuxda u oggol yahay in la shaaciyo lambarrada SSN, ITIN, EIN, iyo TIN — dhammaan kuwaas oo horay loogu gudbiyay MDH — hay'adaha canshuuraha ee federaalka iyo gobolka, iyo shaqaalaha dowladda ee ku shaqada leh bixinta waajibaadka dowladda. Haddii ay khuseyso, lambarradan aqoonsiga waxaa loo isticmaali karaa u hoggaansanaanta sharciyada canshuuraha, waxaana laga yaabaa inay horseedaan tallaabo sharci ah oo Deeq-Qaatuhu lagu waajibinayo inuu bixiyo canshuuro dib u dhacay ama waajibaad kale oo gobolka ah. liabilities.

## 12. Mulkiyadda Qalabka iyo Agabka

### 12.1. Qalabka

"Qalab" waxaa loola jeedaa hanti la taaban karo oo shaqaynaysa muddo ka badan hal sano, oo qiimaha iibsashadiisu yahay ama ka badan yahay $10,000 halkii unug. MDH waxay xaq u leedahay inay dalbato in dhammaan Qalabka lagu iibsaday lacagaha deeqda (oo ay ku jirto lahaanshihiisa sharciyeed) lagu wareejiyo MDH lafteeda ama hay'ad aan dawlad ahayn oo ay MDH si gaar ah u magacaabay. MDH waxay sidoo kale dalban kartaa in Qalabkaas lagu wareejiyo haddii barnaamijka deeqda lagu wareejiyo deeq-qaate kale. Marka uu dhammaado heshiiskan deeqda, Deeq-Qaatuhu waa inuu la xiriiraa Wakiilka u xilsaaranee MDH si uu u helo tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan sida loo maareynayo Qalabkaas.

### 12.2. Agabka

"Agab" waxaa loola jeedaa dhammaan hantida la taaban karo ee aan lagu darin qeexitaanka Qalabka ee kor ku xusan. Haddii uu jiro agab hadhay oo qiimihiisu guud ahaan gaarayo ama dhaafayo $10,000, Deeq-Qaatuhu waa inuu wargeliyaa Wakiilka u xilsaaranee MDH si uu u helo tilmaamo ku saabsan sida loo maareynayo agabkaas. Ujeeddada qodobkan awgiis, "Agab" waxa ay ku jirayaan—laakiin kuma koobna—kombuyuutarro iyo abaalmarinno la siiyo ka qaybgalayaasha.

## 13. Mulkiyadda Agabka iyo Xuquuqda Fikradeed ee Sharciga ah

### 13.1. Mulkiyadda Agabka

" Agab" waxaa loola jeedaa wax kasta oo la ikhtiraacay ama la sameeyay, sida warbixinno, daraasado, naqshado, sawirro, tilmaamo farsamo, qoraallo, dukumeenti, barnaamijyo kombiyuutar, maaddooyin tababar ku saleysan kombiyuutar, iyo wax kasta oo la diiwaangeliyay oo qaab kasta leh. Deeq-Qaatuhu waxa uu leeyahay dhammaan xuquuqda, lahaanshaha, iyo danaha ku saabsan Agabka la maleegay, la

abuuray, ama si kale uga dhashay fulinta heshiiskan deeqda, ha ahaato mid uu kaligiis sameeyay ama si wadajir ah ula sameeyay shaqaalaheeda ama qandaraaslayaasheeda hoose.

Deeq-Qaatuhu wuxuu MDH si rasmi ah u siinayaa ruqsad joogto ah, aan laga laaban karin, oo aan kharash lahayn, si ay MDH ugu nuqul samayso, wax uga beddesho, u faafiso, u fuliso, u sameyso, loo sameeyo, ama si kale loogu adeegsado Agabkaas, iyadoo la adeegsanayo qaab kasta iyo ujeedo kasta oo MDH, go'aankeeda keliya ku saleysan, ay ku aragto in ay ku habboon tahay. Deeq-Qaatuhu, marka ay MDH codsato, waa inuu saxiixaa dhammaan waraaqaha lagama maarmaanka ah iyo talaabooyinka kale ee loo baahan yahay si loogu caddeeyo MDH xuquuqda iyo ruqsadda ku saabsan Agabka. Marka MDH codsato, Deeq-Qaatuhu waa inuu ogolaadaa in MDH ay kormeerto Agabka asalka ah, una soo gudbisaa nuqul Agabkaas ka mid ah, iyadoo aan wax kharash ah laga qaadin, si loogu adeegsado hab kasta oo MDH ku aragto inuu ku habboon yahay.

### 13.2. Xuquuqda Fikradeed ee Sharciga ah

Deeq-Qaatuhu wuxuu ballanqaadayaa oo damaanad qaadayaa in Agabka lagu soo saaray ama lagu isticmaalay heshiiskan deeqda aysan hadda ku xadgudbin, mana ku xadgudbi doonaan mustaqbalka, xuquuqda fikirka ee sharciyeed ee cid kale. Xuquuqahaas waxaa ka mid ah, balse aan ku koobnayn, shatiyada, xuquuqda daabacaadda, siraha ganacsiga, magacyada ganacsiga, iyo calaamadaha adeegga iyo ganacsiga. Deeq-Qaatuhu wuxuu ku waajibinayaa inuu magdhaw siiyo oo difaaco MDH, iyadoo kharashkaas uu bixinaayo Deeq-Qaatuhu, haddii MDH lagula yimaado dacwad ama sheegasho ku saleysan in Agabka oo dhan ama qayb ka mid ah ay ku xadgudbeen xuquuqda fikradeed ee cid kale Deeq-Qaatuhu wuxuu mas'uul ka noqonayaa bixinta dhammaan sheegashooyinka, dalabaadka, waajibaadka, mas'uuliyadaha, kharashaadka, iyo magdhaw kasta oo ka dhasha sheegashooyinkaas, oo ay ku jiraan—laakiin aan ku koobnayn—kharashaadka qareennada ee macquulka ah, kuwaas oo salka ku haya heshiiskan deeqda, wax-ka-beddelkiisa, ama lifaaqyo dheeraad ah oo la xiriira. Haddii sheegasho ama dacwad noocaas ahi ay timaado, ama sida uu arko Deeq-Qaatuhu ama MDH ay suuragal tahay inay timaado, Deeq-Qaatuhu waa inuu, iyadoo MDH go'aankeeda keliya lagu saleynayo, u suurogeliyo MDH inay hesho xuquuq ama ruqsad sharci ah si ay u sii adeegsato Agabka la isku haysto, ama wuxuu beddeli doonaa ama ka saari doonaa agabka la tuhunsan yahay inuu jebinayo xuquuqahaas. Xalkaan sharciyeed wuxuu ahaan doonaa mid dheeraad ah wuxuuna ka mid noqon doonaa dhammaan xalalka kale ee uu sharciyadu oggol yahay.

## 14. Magdhawga Shaqaalaha

Deeq-Qaatuhu wuxuu caddeynayaa inuu u hoggaansan yahay Qodobka 176.181, Qayb-hoosaadka 2 ee Sharciga Minnesota, kaas oo quseeya caymiska magdhawga shaqaalaha. Shaqaalaha iyo wakiillada Deeq-Qaatuhu, iyo qandaraasle kasta oo uu shaqaaleysiiyo Deeq-Qaatuhu si uu u fuliyo hawlaha lagu xusay heshiiskan deeqda iyo shaqaalaha qandaraaslahaas, looma tixgelin doono in ay yihiin shaqaale dawladeed. Dacwado kasta oo laga yaabo inay ka dhashaan Xeerka Magdhawga Shaqaalaha ee Minnesota iyada oo loo marayo shaqaalahan, iyo sheegasho kasta oo ay soo gudbiso cid saddexaad oo ka dhalata ficil ama dayacaad ka timaadda shaqaalahaas, mas'uuliyaddooda ma saarna MDH, mana aha waajib ama xil dusha ka saaran MDH.responsibility.

# 15. Faafinta Warbaahinta iyo Taageeridda

## 15.1. Taageeridda

Haddii la bixiyo faafin warbaahineed oo la xiriirta barnaamijka, daabacaadaha, ama hawlaha laga qabtay heshiiskan deeqda, waxaa waajib ah in si cad loogu muujiyo in Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) tahay hay'adda maalgelisay. Faafintaas waxaa ka mid noqon kara—laakiin kuma koobna—ogeysiisyo, buug-yaro xogeed, war-saxaafadeedyo, cilmi-baarisyo, warbixinno, astaamo, iyo ogeysiisyo kale oo dadweyne oo ay diyaariyeen ama loogu diyaariyay Deeq-Qaatuhu, shaqaalaheeda, si gaar ah ama si wadajir ah ula shaqeeyayaal kale, ama subgrantee-yada. Haddii faafintaasi aan si gaar ah loogu oggolaan heshiiskan deeqda, Deeq-Qaatuhu waa inuu horay u helo oggolaansho qoraal ah oo uga yimid Wakiilka u xilsaaranee MDH. Haddii deeqdan lagu bixiyo lacag federaal ah, waa in sidoo kale si cad loo aqoonsadaa barnaamijka federaalka ee maalgelinta bixiyay.

## 15.2. Taageeridda

Deeq-Qaatuhu ma sheegan karo in Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) ay taageerto alaabtiisa, adeeggiisa, ama hawlihiisa.

# 16. Sharciga Lagu Maamulo, Awoodda Maxkamadeed, iyo Meesha Dacwadda Lagu Qabto

Heshiiskan deeqda, iyo wax-ka-beddellada ama lifaaqyada la socda, waxaa lagu xukumayaa sharciyada Gobolka Minnesota. Dacwad kasta oo ka dhalata heshiiskan, ama jebintiisa, waxaa lagu dhegeysan doonaa maxkamadda gobolka ama federaalka ee ku taalla Degmada Ramsey, Minnesota, oo leh awood sharciyeed oo ku filan.

# 17. Khaladaadka Qoraalka

Iyadoo aan loo eegin qodobka "Wareejinta, Wax-ka-beddelka, Ka-Tagidda, iyo Heshiiska Deeqda oo Dhameystiran", MDH waxay leedahay xaq ay keli ku tahay inay saxdo khaladaad qoraal ah—kuwaas oo ay ka mid yihiin qaladaad higgaadeeya, naxwe ahaaneed, ama khaladaad yaryar oo qoraal ah—haddii ayan si weyn u saameynaynin nuxurka ama ujeedada heshiiska. MDH waa inay si macquul ah ugu wargelisaa Deeq-Qaatuhu khaladaadkaas la saxo sida ku cad qodobkan, waqtiga ku habboon.

# 18. Loollanka Siyaasadeed

**18.1.** Deeq-Qaatuhu waa inuu xaqiijiyaa in aan wax lacag deeq ah loo isticmaalin loollan siyaasadeed. Tani waxa ay ka mid tahay in aan la bixin wax mushaar ah ama magdhow ah cid kasta si ay u saameyso ama iskudaydo inay saameyso sharci-dejiyeyaasha ama masuuliyiinta dadweynaha—si taageero ama diidmo loogu muujiyo sharci la soo jeediyay—ama arrimo la xiriira helitaanka qandaraas federaal ah, deeq federaal ah, ama heshiis wada-shaqeyn ah, ama kordhin, cusboonaysiin, wax-ka-beddel, ama ballaarin la xiriirta midkood.

**18.2.** Sida ku cad Qodobka 31 USC § 1352, haddii Deeq-Qaatuhu uu adeegsado lacag ka baxsan deeqda federaalka ee MDH bixisay si uu u fuliyo hawlaha kor ku xusan, waa inuu buuxiyaa foomka

shaacinta ee MDH faray oo u gudbiyaa. Sidoo kale, Deeq-Qaatuhu waa inuu qeybtaas qoraalka ah ku daro dhammaan qandaraasyada iyo qandaraas-hoosaadyada, waana in dhammaan qandaraaslayaasha iyo subgrantee-yada raacaan.

**18.3.** Si kastaba ha ahaatee, waxaa la oggol yahay in la bixiyo wacyigelin waxbarasho oo ku saabsan muhiimadda siyaasadaha caafimaadka dadweynaha. Waxbarashadu waxaa ka mid ah bixinta xaqiiqooyin, falanqayn xogeed, warbixinno, sharaxaad barnaamijyo, iyo macluumaad ku saabsan miisaaniyadda iyo saameynta ay dadku kala kulmaan, laakiin ma jirto talo sharci gaar ah oo la siinayo.

**18.4.** Marka uu saxiixo heshiiskan deeqda, Deeq-Qaatuhu wuxuu caddeynayaa in uusan adeegsan doonin wax lacag ah oo ka timid MDH si uu shaqaale uga dhigo, qandaraas ula galo, ama u dardar-geliyo shaqada qof loollan siyaasadeed ku howlan, sida lagu qeexay Qodobka 10A.01, Qayb-hoosaadka 21 ee Sharciga Minnesota. Qodobkan waxa uu sidoo kale khuseeyaa dhammaan subgrantee-yada ama qandaraaslayaasha uu Deeq-Qaatuhu ku lug leeyahay ee fulinaya hawlaha la xiriira heshiiskan deeqda.

## 19. Shuruudda Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha

Deeq-Qaatuhu wuxuu u hoggaansami doonaa Qodobka 201.162 ee Sharciga Minnesota, iyadoo la siinayo adeegyada diiwaangelinta codbixiyeyaasha shaqaalaheeda iyo dadweynaha uu u adeego.

## 20. Shahaadada Mamnuucidda, Hakinta iyo Mas'uuliyadda

Xeerka federaalka ee 2 CFR § 200.214 wuxuu mamnuucayaa in MDH ay ku iibsato badeecooyin ama adeegyo lacag federaal ah cid kasta oo ay dowladda federaalku mamnuucday (debarred) ama hakisay (suspended). Sidoo kale, Qodobka 16C.03, Qayb-hoosaadka 2 iyo Qodobka 16B.97, Qayb-hoosaadka 3 ee Sharciga Minnesota ayaa siinaya Wasiirka Maamulka awood uu ku mamnuuci karo ama ku hakin karo cid kasta oo raba inay heshiis la gasho MDH.

Qof kasta waxaa la mamnuuci karaa ama la hakin karaa haddii, iyada oo loo marayo hab-dhismeed sharciyeed oo la oggolaaday, lagu helo inuu si xun u isticmaalay kalsoonida dadweynaha. Gaar ahaan, dowladda federaalka waxay ka filaysaa MDH inay leedahay nidaam lagu hubinayo in bixiyaha adeeggu aanu horay loogu mamnuucin ama loo hakinin, isla markaana la hubiyo in aan la siinin lacag federaal ah.

Marka uu saxiixo heshiiskan deeqda, Deeq-Qaatuhu wuxuu caddeynayaa in isaga iyo madaxdiisu:

a) Aanay hadda ku jirin liiska dadka la mamnuucay, la hakiyay, lagu taliyay in la mamnuuco, laga dhigay kuwo aan u qalmin, ama si iskiis ah isaga reebay ganacsi la leh waax ama hay'ad dowladeed oo federaal, gobol ama mid deegaan ah;

b) Aan lagu xukumin ama aan lagu ridin go'aan madani ah saddex sano ee ka horreeyay heshiiskan deeqda oo ku saabsan: (1) khiyaano ama dembi la xiriira helidda ama isku dayga helidda heshiis dowladeed; (2) jebinta sharciyada federaalka ama gobolka ee lidka ku ah tartanka (antitrust); ama (3) musuqmaasuq, xatooyo, been-abuur, laaluush, wax-ka-bedelid ama burburin diiwaanno, sheegashooyin been ah, ama helid hanti la xaday;

c) Ma aha kuwo haatan lagu soo oogay dacwad ciqaabeed ama madani ah oo ka timid hay'ad dowladeed taasoo ku saabsan: (1) fal khiyaano ah ama dembi la xiriira helidda, isku dayga helidda,

ama fulinta heshiis dowladeed (ha ahaado federaal, gobol ama mid deegaan); (2) jebinta sharci kasta oo ka tirsan sharciyada tartanka ee federaalka ama gobolka (antitrust laws); ama (3) ku lug lahaanshaha musuqmaasuq, xatooyo, been-abuur, laaluush, wax-ka-bedel ama burburin diiwaanno, sheegid been ah, ama hanti la xaday iyo;

d) Ma hayaan wax xog ah, mana laha aqoon sheegaysa in qandaraas-hoosaad kasta oo ka shaqeynaya hawlaha la xiriira heshiiskan deeqda uu jebiyay mid ka mid ah shahaadooyinka kor lagu xusay.

## 21. Abaalmarinno

Haddii abaalmarinnada lagu daro Qorshaha Shaqo ama Miisaaniyadda la oggolaaday, luqadda soo socota ayaa la adeegsadaa:

### 21.1. Maareynta Abaalmarinnada

Deeq-Qaatuhu waxaa looga baahan yahay inuu yeesho siyaasado iyo habraacyo cad oo lagu hagayo iibsiga, ilaalinta, qaybinta, iyo raad-raaca hantida la xiriirta abaalmarinnada. Dhammaan shaqaalaha Deeq-Qaataha ee ku lug leh iibsiga, qaybinta, ilaalinta, iyo dib-u-heshiisiinta abaalmarinnada waa in la siiyo tababar rasmi ah oo ku saabsan siyaasadaha iyo habraacyadaas, ka hor inta Deeq-Qaatuhu uusan dalbanin abaalmarinno., Siyaasadahaan iyo habraacyadani waa inay ugu yaraan ka koobnaadaan qodobbada lagu caddeeyay qaybtaan.

### 21.2. Kala Saaridda Shaqada

In ka badan hal shaqaale oo ka tirsan Deeq-Qaatuhu waa inay ku lug yeeshaan maamulka iyo maareynta abaalmarinnada. Shaqaalaha Deeq-Qaataha ee oggolaada iibsiga abaalmarinnada ma lahaan karaan keli ahaansho dhanka helitaanka jireed ee abaalmarinnada. Shaqaalaha haysta helitaanka jireed ee abaalmarinnada ma yeelan karaan keli ahaansho dhanka wax-ka-beddelka diiwaanka abaalmarinnada. Marka abaalmarin loo gudbiyo shaqsi kale, waa in la diiwaan geliyaa wareejintaas si rasmi ah.

### 21.3. Qaybinta Abaalmarinnada

Abaalmarinnada waxaa loo isticmaali karaa oo keliya ujeedooyinka MDH ay si gaar ah u oggolaatay.

a) Hal abaalmarin keliya ayaa lagu siin karaa qof kasta dhacdo ama munaasabad kasta.

b) Abaalmarinnada aan la qaybin weli waa in mar walba lagu hayaa meel ammaan ah. Alaabta abaalmarinta ah lama kaydin karo meel guri gaar ah ah; waa in si buuxda loogu kaydiyaa gudaha goobta ganacsiga ee Deeq-Qaataha si loo sugo amniga.

c) Deeq-Qaatuhu wuxuu iibsan karaa una hayn karaa wax ka badan maalgashi saddex bilood ah oo abaalmarinno ah, iyada oo lagu saleynayo Qorshaha Shaqo ee ugu dambeeyay ee la oggolaaday. Dhammaan abaalmarinnadaas waa in la qaybiyo ka hor inta Deeq-Qaatuhu uusan dalban abaalmarinno cusub.

d) Deeq-Qaatuhu wuxuu mas'uul ka noqonayaa kharashka abaalmarin kasta oo aan la qaybin marka uu dhammaado heshiiska deeqda.

e) Haddii MDH ay siiso Deeq-Qaatuhu abaalmarinnada, kuwa aan la qaybinin waa in si toos ah loogu celiyo MDH iyada oo lala kulmayo Wakiilka Dowladda ee La Oggol yahay, 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda dhammaadka heshiiska. Haddii aanay suuragal ahayn in si fool ka fool ah loo celiyo, waa in abaalmarinnada aan la qaybiyin lagu soo celiyo adeeg bixiye (courier) ama boostada Mareykanka (US Mail) iyadoo la adeegsanayo adeeg la socon karo oo saxiix u baahan, 30 maalmood gudahood laga bilaabo dhammaadka heshiiska.

f) Diiwaanka raad-raaca waa in si gooni ah loogu soo celiyo, oo aan lala dirin kaararka jireed. Qaabka la doorbidayo ee dib-u-celinta diiwaanka raad-raaca waa elektaroonik ahaan (email ama file la wado).

## 21.4. Diiwaangelinta Raad-raaca Abaalmarinnada

Diiwaangelinta raad-raaca ee ay tahay in Deeq-Qaatuhu ilaaliyo ma lahaan karto wax xog gaar ah oo qarsoodi ah (data gaarka ah ee qofka). Nidaamka raad-raaca waa inuu kaydiyaa waxyaabaha soo socda:

a) Tirada abaalmarinnada la hayo, oo ay ku jirto baaqiga bilowga iyo abaalmarinnada cusub ee la iibsaday;

b) Sharaxaadda abaalmarinnada;

c) Tirada abaalmarin(yo) ee la siiyay ka qaybgal kasta;

d) ) Afarta nambar ee ugu dambeysa ee kaararka hore loo bixiyay (pre-paid);

e) Qiimaha / xaddiga lacagta ee abaalmarinta;

f) Xog gaar ah oo aan la aqoonsan karin ee qofka ka qaybgalaha ah (tusaale ahaan, lambarka kiisaska ama faylka);

g) Taariikhda uu ka qaybgaluhu helay abaalmarinta(da) iyo;

h) TaariSaxiixa xubinta shaqaalaha Deeq-Qaataha ee bixisay abaalmarinta(da) qofka ka qaybgalaha ah.

## 21.5. Dib-u-heshiisiinta

Ugu yaraan laba shaqaale oo kala duwan oo ka tirsan Deeq-Qaataha waa inay fuliyaan dib-u-heshiisiin (reconciliation) abaalmarinnada ugu yaraan saddexdii biloodba mar. Shaqaalaha fulinaya dib-u-heshiisiinta ma noqon karaan kuwa gacanta ku haya ama qaybiyay abaalmarinnadaas. Diiwaanka dib-u-heshiisiinta waa inuu ka koobnaadaa taariikhaha iyo saxiixyada labada qof ee dib-u-heshiisiinta sameeyay. Deeq-Qaatuhu waa inuu u gudbiyaa dukumeentiyada dib-u-heshiisiinta Wakiilka Dowladda ee La Oggol yahay ugu dambeyn laba toddobaad (14 maalmood) gudahood ka dib marka dib-u-heshiisiintu dhacdo.

## 21.6. Qandaraas-hoosaadka / Deeq-hoosaadka

Deeq-Qaatuhu waa inuu si cad u xaqiijiyaa oo u wargeliyaa in qandaraaslayaashooda-hoosaadka ama deeq-hoosaadyadoodu ay adeegsanayaan abaalmarinnada oo keliya ujeeddooyinka ay MDH oggolaatay. Deeq-Qaatuhu wuxuu mas'uul ka noqonayaa kormeerka, dabagalka, iyo dib-u-heshiisiinta abaalmarin kasta oo ay iibsadaan ama qaybiyayaan subgrantees ama subcontractors, wuxuuna waa inuu ku daro isla luqaddan heshiis kasta oo uu la galo hay'adahan ku lugta leh shaqada MDH.

### 21.7. Abaalmarino Lumay ama La Xaday

Deeq-Qaatuhu wuxuu si buuxda u qaadanayaa mas'uuliyadda maaliyadeed ee ku saabsan abaalmarin kasta oo aan la xisaabtamin, la waayay, ama la xaday.

### 21.8. Biilasha

Haddii Deeq-Qaatuhu yahay kan iibsaday abaalmarinnada, waa inuu u gudbiyaa MDH biilasha kaliya marka abaalmarinnadaas si buuxda loo qaybiyay.

### 21.9. Ku Guuldareysiga U-hoggaansanaanta

Haddii Deeq-Qaatuhu uusan lahayn siyaasad iyo habraacyo qoran oo wax ku ool ah ka hor inta uusan iibsiga abaalmarinnada bilaabin, MDH waxay xaq u leedahay inay hakiso lacag-bixinta ama ay codsato in dib loo celiyo lacag u dhiganta kharashaadka aan la oggolayn. Lacagaha la hakiyay waxa la sii dayn doonaa marka Deeq-Qaatuhu u soo gudbiyo MDH dukumeenti caddeynaya in uu haatan leeyahay siyaasad iyo habraacyo qoran oo wax ku ool ah.Deeq-Qaatayaasha aan u hoggaansamin shuruudahan waxaa laga yaabaa in si gaar ah loo kormeero, waxaana loo soo bandhigi doonaa caawinaad farsamo. MDH waxay sidoo kale xaq u leedahay inay joojiso heshiiska deeqda haddii lagu guul darreysto in la raaco shuruudahan.

## 22. Is Khilaafka Danaha

Deeq-Qaatuhu waa inuu wargeliyaa Wakiilka u xilsaaranee MDH marka uu ogaado wax is khilaaf dan ah—ha noqoto mid suuragal ah, la dareemayo, ama dhab ah—oo la xiriira heshiiskan deeqda.

## 23. Shaacinta Qasabta ah

Codsadayaal, deeq-qaataayaal, ama subgrantee-yaasha helaya maalgelin hoos yimaada heshiiskan deeqda ah waa in si degdeg ah u shaaciyaan haddii, iyadoo la fulinayo heshiiskan (oo ay ku jiraan hawl kasta ama deeq-hoosaadyo), ay hayaan caddeyn la isku halleyn karo oo muujinaysa in lagu xadgudbay sharciga ciqaabta ah—gaar ahaan kuwa la xiriira khiyaano, is khilaaf dan, laaluush, ama waxyaabo la mid ah—ee ku xusan Cinwaanka 18 ee Sharciga Mareykanka ama Sharciga Minnesota cutubkiisa 609. Waxaa kale oo ay khasab tahay inay shaaciyaan jebinta Sharciga Beenta ee Madaniga ah (31 U.S.C. 329–3733) ama Qodobka 609.465 ee Sharciga Minnesota (ka mamnuucaya soo bandhigista sheegashooyin been ah mas'uul dowladeed ama hay'ad dadweyne). Shaacinta waa in lagu sameeyaa qoraal, looguna gudbiyaa hay'adda federaalka (haddii ay khuseyso), xafiiska kormeeraha guud ee hay'addaas (Inspector General), iyo MDH. Codsadayaasha, deeq-qaataayaasha, iyo subgrantee-yada waxaa sidoo kale laga rabaa inay ka warbixiyaan arrimaha la xiriira anshaxa iyo waxqabadka deeq-qaataha sida lagu faray Lifaaqa XII ee 2 CFR § 200. Haddii aan la fulin waayo waajibaadkan shaacinta, waxay keeni kartaa in la adeegsado tallaabooyinka lagu caddeeyay **2 CFR § 200.339**. (Sidoo kale eeg: 2 CFR § 180, 31 U.S.C. 3321, iyo 41 U.S.C. 2313.

## 24. Ilaalinta Shaqaalaha Warbixiya

Shaqaale ka tirsan deeq-qaate ama subgrantee lama eryi karo, looma darajo-dejin karo, looguma takoori karo si aargoosi ah haddii uu si daacadnimo leh xog ugu gudbiyo wakiil ka tirsan MDH ama qof ama hay'ad lagu tilmaamay qodobka (a)(2) ee 41 U.S.C. 4712, taasoo uu rumeysan yahay in ay muujinayso maamul-xumo weyn oo ka dhacday heshiis dowladeed ama deeq, khasaaro weyn oo lacag federaal ama gobol ah, si xun loo isticmaalay awoodda maamulka ee la xiriirta heshiis ama deeq dowladeed, khatar weyn oo gaar ah oo caafimad ama badbaado u ah dadweynaha, ama jebinta sharci, xeer, ama nidaam la xiriira heshiis ama deeq dowladeed oo ay ku jirto tartanka ama wada-hadallada heshiiskaas. Deeq-qaataha iyo subgrantee-yada waa inay shaqaalahooda si qoraal ah ugu wargeliyaan xuquuqda iyo ilaalinta shaqaalaha warbixiya sida ku xusan 41 U.S.C. 4712 iyo Sharciga Minnesota Qodobbada 15C.145 iyo 181.932 ilaa 181.935. Waxaa intaa dheer in la tixraaco shuruudaha sharciga ah ee ilaalinta warbixiyeyaasha ee ku qoran 10 U.S.C. 4701, 41 U.S.C. 4712, 41 U.S.C. 4304, iyo 10 U.S.C. 4310.

## 25. Joojinta Heshiiska

### 25.1. Joojinta ay Sameyso MDH ama Deeq-Qaatuhu

MDH ama Deeq-Qaatuhu waxay joojin karaan heshiiskan deeqda iyaga oo aan sabab bixin, balse ay ku wargeliyaan dhinaca kale ugu yaraan 21 maalmood oo shaqo ah, si qoraal ah (tusaale ahaan, warqad, iimayl, ama labadaba). Marka la joojiyo heshiiska, Deeq-Qaatuhu wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo lacag si ku saleysan heerka shaqada la qabtay, iyadoo lagu qiimeynayo cabbirka hawsha la fuliyay ee lagu qanco.

### 25.2. Joojinta Sabab La Xiriirta

MDH waxay joojin kartaa heshiiskan deeqda si degdeg ah haddii ay ogaato in Deeq-Qaatuhu uu ku guul darreystay inuu u hoggaansamo shuruudaha ku cad heshiiskan, haddii horumar waqtiyeysan aan la samayn, ama haddii ay caddahay in ujeeddooyinka lacagta deeqda loo qoondeeyay aan la fulin doonin ama aan la fulin. MDH waxay qaadi kartaa tallaabo kasta oo lagu ilaalinayo danaha Dowladda Gobolka Minnesota, oo ay ka mid noqon karto in la joojiyo bixinta lacagaha dheeraadka ah, iyo in la dalbado in dib loo celiyo dhammaan ama qayb ka mid ah lacagihii horay loo bixiyay.

### 25.3. Joojinta Sababta oo ah Dhaqaale La'aan

MDH waxay si degdeg ah u joojin kartaa heshiiskan deeqda haddii aysan helin maalgelin ka timaadda Golaha Sharci-dejinta ee Minnesota ama ilo dhaqaale kale, ama haddii maalgelintu aysan sii socon karin heer ku filan si loo bixiyo kharashka shaqada lagu cayimay heshiiskan. Joojinta waa in lagu sameeyaa ogaysiis qoraal ah oo loo diro Deeq-Qaatuhu, iyada oo loo marayo boosto, iimayl, ama labadaba. MDH ma laha waajib ah inay bixiso lacag hawl kasta oo la qabtay kadib taariikhda lagu wargeliyay iyo taariikhda dhaqan-galka ee joojinta. Si kastaba ha ahaatee, Deeq-Qaatuhu wuxuu xaq u leeyahay lacag lagu xisaabiyo cabbirka shaqada la qabtay si lagu qanco, illaa iyo inta ay jirto maalgelin la heli karo. MDH laguma xisaabin doono ganaax haddii heshiiska deeqda la joojiyo sabab la xiriirta go'aan ay gaartay Golaha Sharci-dejinta ee Minnesota ama ilo kale oo deeq bixiya ah, oo aan ansixin

maalgelinta. MDH waa inay si macquul ah ugu wargelisaa Deeq-Qaatuhu marka ay hesho ogeysiiska la'aanta maalgelinta.

## 25.4. Joojinta uu Sameeyo Wasiirka MaamulkaAdministration

Wasiirka Maamulka wuxuu si degdeg ah oo keligiis ah u burin karaa heshiiskan deeqda haddii uu go'aamiyo in sii wadidda heshiiska aysan u adeegeynin ujeeddooyinka MDH ama aysan dan u ahayn Dowladda Gobolka Minnesota.

# Lifaaqa – Lacagaha Federaalka

## Macluumaadka Abaalmarinta Federaalka

### Macluumaadka Gaar ah ee Looga Baahan Yahay Deeq-Qaatayaasha Helaya Lacag Federaal ah

Magaca Aqoonsiga Gaar ahaaneed ee Hay'adda Deeq-Qaataha (UEI)

Lambarka Aqoonsiga Gaar ahaaneed ee Hay'adda Deeq-Qaataha (UEI)

### Macluumaadka Laga Rabo Abaalmarinta Federaalka

Magaca Hay'adda Federaalka ee Abaalmarinta Bixisay
Magaca Liiska Gargaarka (hore waxaa loo yaqaanay Kaatalookga Gargaarka Dowladda Federaalka "CFDA")
Lambarka Liiska Gargaarka
Magaca iyo Sanadka Sharciga/Awoodda Sharciyeed ee Abaalmarinta
Lambarka Aqoonsiga Abaalmarinta Federaalka (FAIN) / Lambarka Gudbinta ee Deeq-bixiyaha
Taariikhda Abaalmarinta Federaalka (taariikhda MDH ay heshay deeqda federaalka ah)
Abaalmarintan ma u tahay Cilmi-baaris iyo Horumarin
Sharaxaadda Mashruuca
Wadarta Lacagta Abaalmarinta Federaalka ee ay heshay MDH
Qaddarka lacageed ee deeqda federaalka ah ee ay MDH siinayso Deeq-Qaatuhu

## Shuruudaha iyo Xaaladaha Abaalmarinnada Federaalka

1. ***Lacag-bixinta.*** Lacagaha lagu bixiyo heshiiskan waxa laga bixinayaa ilaha dhaqaale ee federaalka ah ee ay MDH heshay, iyadoo loo marayo deeqaha federaalka ee kor lagu taxay. Deeq-Qaatuhu waa masuul ka ah inuu u hoggaansamo dhammaan shuruudaha federaalka ee lagu xiro lacagahaas, wuxuuna si buuxda u aqbalayaa masuuliyadda maaliyadeed ee ka dhalata haddii uu ku guuldareysto u hoggaansanaanta shuruudahaas.

2. ***Shuruudaha Kormeerka Maaliyadeed***

   ***2.1.*** Deeq-qaataayaasha ah dowlad-goboleedyo, hay'ado aan faa'iido doon ahayn, ama Qabiilooyin Mareykan ah:

   ***2.1.1.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay in:

   ***i.*** la helo kormeer maaliyadeed oo hal-mar ah ama mid barnaamij u gaar ah oo lagu sameeyo sannad-xisaabeedka, iyadoo la raacayo shuruudaha Xeerka Kormeerka Hal-mar ee 1984, oo la beddelay (31 U.S.C. ch. 75) iyo 2 CFR § 200; iyo,

   ***ii.*** uu u hoggaansamo Xeerka Kormeerka Hal-mar ee 1984, oo la beddelay (31 U.S.C. ch. 75) iyo 2 CFR § 200.

   ***2.1.2.*** Kormeerka waa in la sameeyaa sanad kasta, haddii aanay Deeq-Qaatuhu ahayn dowlad hoose ama mid goboleed oo leh shuruudo dastuur ama sharci oo ka horreeya Janaayo 1,

1987, kuwaas oo oggolaanaya kormeerro aan sanadle ahayn. Dowladahaas, hay'adda federaalka ee kormeerka mas'uulka ka ah waa inay oggolaato kormeer laba-sano mar ah haddii dowladdu sidaas codsato. Sidoo kale waa in la tixgeliyo codsiyadaas haddii ay ku saleysan yihiin siyaasado maamul oo jiray ka hor Janaayo 1, 1987.

***2.2.*** Deeq-qaataayaasha ah jaamacado ama isbitaallo:

***2.2.1.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay in la sameeyo kormeer maaliyadeed iyo mid waafaqsan sharciga, iyadoo lagu saleynayo 2 CFR § 200. Kormeerkaas waa inuu daboolaa ururka oo dhan ama dhammaan lacagaha federaalka ee ay hayaan.o

***2.2.2.*** Kormeerka waa inuu go'aamiyaa haddii Deeq-Qaatuhu si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka khuseeya uu u isticmaalay lacagaha federaalka ah.

***2.3.*** Kormeerka waa in uu fuliyaa kormeere madaxbannaan. Kormeere madaxbannaan waa kormeere dowladeed (gobol ama hoose) ama xisaabiye dadweyne oo buuxiya heerarka madaxbannaanida ee lagu sheegay "Heerarka Kormeerka Ururrada Dawladda, Barnaamijyada, Hawlaha iyo Shaqooyinka" ee ay dejisay Xafiiska Xisaabiyaha Guud (GAO).

***2.4.*** Warbixinta kormeerka waa in si cad u sheegtaa in kormeerka lagu sameeyay si waafaqsan shuruudaha lagu xusay 2 CFR § 200.

***2.4.1.*** Shuruudaha warbixinta ee la xiriira warbixinnada kormeerka waa in ay waafaqsan yihiin hagaha kormeerka ee uu soo saaray **Ururka Mareykanka ee Xisaabiyeyaasha Dadweynaha ee La Shaahaadeeyay (AICPA)**, kaas oo cinwaankiisu yahay *"Audits of State and Local Governmental Units"* lagana soo saaray sanadkii 1986. Dowladda Federaalka waxay oggolaatay in la isticmaalo hagahan kormeerka.

***2.4.2.*** Marka lagu daro warbixinta kormeerka, Deeq-Qaatuhu waa inuu bixiyo faallooyin ku saabsan waxyaabaha laga helay kormeerka iyo talooyinka lagu bixiyay, oo ay ku jiraan qorshe tallaabo saxid ah oo la qaaday ama lagu talinayo in la qaado, iyo faallooyin ku saabsan xaaladda tallaabooyinka hore ee saxidda. Haddii aan loo baahnayn tallaabo saxid ah, waa in la raaciyo warbixinta kormeerka qoraal sharaxaya sababta aan tallaabo loo qaadin.

***2.5.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay in deeq-bixiyaha, Kormeeraha Sharci-dejinta (Legislative Auditor), Kormeeraha Gobolka (State Auditor), iyo kormeere kasta oo madaxbannaan oo uu magacaabo deeq-bixiyuhu ay helaan marin buuxa oo ay u baahdaan si ay u galaan diiwaannada iyo xisaabaadka Deeq-Qaataha, taasoo muhiim u ah u hoggaansanaanta Xeerka Kormeerka Hal-mar ee 1984, oo la beddelay (31 U.S. Code Cutubka 75) iyo 2 CFR § 200.§

***2.6.*** Grantees Deeq-Qaatayaasha helaya gargaarka maaliyadeed ee federaalka oo ka yimaadda subgrantee-yaasha sidoo kale waa inay u hoggaansamaan Xeerka Kormeerka Hal-mar ee 1984, oo la beddelay (31 U.S. Code Cutubka 75) iyo 2 CFR § 200.

***2.7.*** The Foomka *Statement of Expenditures* waxaa loo isticmaali karaa jadwalka gargaarka federaalka.

***2.8.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay in uu haysto dukumentiyo taageeraya jadwalka gargaarka federaalka muddo aan ka yarayn afar sano.

***2.9.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay inuu gudbiyo warbixinnada kormeerka ee waajibka ah sagaal bilood gudahood laga bilaabo dhammaadka sannadka maaliyadeed ee Deeq-Qaataha. Waxaa waajib ah sida lagu xusay 2 CFR § 200 in hal nuqul oo warbixinta kormeerka ah lagu gudbiyo Federal Audit Clearinghouse (FAC) 30 maalmood gudahood ka dib marka la soo saaro Federal Audit Clearinghouse (FAC) (https://www.fac.gov/).

3. ***Meel Shaqo oo Ka Madaxbannaan Maandooriyaha.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay inuu u hoggaansamo Xeerka Shaqaalaha Ka Madaxbannaan Maandooriyaha ee 1988 (Drug-Free Workplace Act of 1988), kaas oo lagu dhaqan geliyay 34 CFR § 85, qayb-hoosaadka F.

4. ***Fursad Shaqo oo Sinnaan ah .*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay inuu u hoggaansamo Amarka Madaxtooyada 11246 ee ku saabsan "Fursad Shaqo oo Sinnaan ah", sida uu wax ka beddelka ugu sameeyay Amarka Madaxtooyada 11375, lana raaco xeerarka lagu xusay 41 CFR § 60.

5. ***Mabaadi'da Kharashka.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay inuu u hoggaansamo xeerarka lagu xusay **2 CFR § 200**, oo si guud loogu yaqaan "Hagaha Isku-dhafan" (Uniform Guidance), kuwaas oo qeexaya mabaadi'da kharashka la xiriira maamulka deeqaha loogu talagalay hay'adaha waxbarasho, dowladaha gobol iyo hoose, qabiilooyinka Mareykanka, ama hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn.

6. ***Xuquuqda Ikhtiraacyada – Shaqooyinka Tijaabada, Horumarinta, ama Cilmi-baarista.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay inuu u hoggaansamo **37 CFR § 401**, oo ah "Xuquuqda Ikhtiraacyada ay Sameeyaan Hay'adaha aan Faa'iido Doonka ahayn iyo Ganacsiyada Yaryar ee Hoos yimaada Deeqaha Dawladda, Qandaraasyada, iyo Heshiisyada Wada-shaqeynta", iyo dhammaan xeerar kale oo dheeraad ah oo ay soo saarto hay'adda deeq-bixinta.

7. ***Xeerka Hawada Nadiifta ah.*** Deeq-Qaatuhu wuxuu oggol yahay inuu u hoggaansamo dhammaan heerarka, amarada ama xeerarka khuseeya ee lagu bixiyay iyadoo la raacayo **Xeerka Hawada Nadiifta ah** ee wax laga beddelay (**42 U.S.C. § 7401 iyo wixii la halmaala**) iyo **Xeerka La-dagaallanka Wasakhowga Biyaha** ee la beddelay (**33 U.S.C. § 1251 iyo wixii la halmaala**). Haddii lagu xadgudbo xeerarkan, waa in lagu wargeliyaa Xafiiska Gobolka ee Hay'adda Ilaalinta Deegaanka (EPA) ee hay'adda deeq-bixinta federaalka ah.

8. ***Shahaadooyinka Isgaarsiinta.*** Marka uu saxiixo heshiiskan, Deeq-Qaatuhu wuxuu caddeynayaa in uu si buuxda ula jaanqaadayo **2 CFR § 200.216** iyo **Qodobka 889 ee Xeerka John S. McCain National Defense Authorization Act** ee Sannad Miisaaniyadeedka 2019, **Pub. L. 115-232 (August 13, 2018)**. Deeq-Qaatuhu ma iibsan doono, ma dalban doono, mana cusbooneysiin doono ama kordhin doono heshiis ku saabsan helitaanka ama adeegsiga "qalabka ama adeegyada isgaarsiinta ee daboolan" (sida lagu qeexay Qodobka 889 ee xeerka). Deeq-Qaatuhu wuxuu ku dari doonaa shahaadadan dhammaan heshiisyada kale ee la xiriira heshiiskan deeqda ah.

Waaxda Caafimaadka Minnesota
Xafiiska Deeqaha
health.grantsoffice@state.mn.us
www.health.state.mn.us/about/grants/

June 2025

*Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, fadlan la xiriir: health.grantsoffice@state.mn.us.*